## Goorma ayaan la qaadan karin tallaalka BCG?

Waa in aadan qaadan BCG
Haddii aad:


- hore u qaaday TB
- jidhkaaga hore loogu arkay TB 3 bilood ee ina dhaafay
- hore u qadatay BCG oo jidhkaaga uu ka muuqdo BCG ama
- haysato waraaqda tallaalka BCG
- aad tallaal kale qaadatay 4 toddobaad ee tagay
- qabto jirro ba'an sida kansarka
- qabto xaalad jirro maqaar
- leedahay ama ay ku hayso xumad sare (qandho)

ama haddii aad:

- qaadato daawada "steroid"
- uur leedahay
- qabto HIV.

Haddii aanad hubin in aad qabto HIV/AIDS, waa in laguu sameeyo baadhitaanka HIV.

## Sidee la isku siiyaa tallaalka BCG?



BCG waxa lagu bixiyaa durniin gacanta inteeda hore ah; Waxay kaaga tagi doontaa nabar yar, oo baa'bi' doona saacdo kadib.

## Maxaa dhici doona marka xiga?

2-6 toddobaad gudahood ayey meeshii tallalku soo buurnaan doontaa oo ay maalmo  dhawr ah xanuun yeelan. Meesha buuran ayaa yeelan wax cad, ama dheecaan. Waxa laga yaabaa inay qaadato ilaa 6 bilood ai ay bogsato oo ay dabeedna noqoto xariijin balaadhan.

Waa muhiim in aanad tuujin ama xoqin meesha oo ay hawada u furnaato, iyada oo aan daboolnayn, baandhayjna la saarin. Haddii meesha tallaalku dheecaan yeelato waa laga dabooli karaa biyaha marka la qubaysanayo. Ka ilaali meesha kareemada iyo cadarka.

Kadib tallalka marka la qaato, waa inaan tallaalo kale laga qaadan gacantaas muddo 3 bilood ah.



NHS
Bristol
South Gloucestershire

# Understanding Tuberculosis (TB)
# Fahamka Qaaxada (TB)

**Information for people coming to live in the UK**
**Macluumaad loogu talogalay dadka ku nool UK**

Haddii aad ka welwelsantahay TB waxaad wici kartaa khadka tooska ah ee NHS Direct  0845 4647 – waxay ku siin karaan talo la turjumaanay.

Haddii aad macluumaadkan ugu baahan tahay af kale, ama qaab kale sida farta indhoolaha "Braille", cajalado, far waaweyn, ama disk, fadlan la xiriir: The Haven ee 0117 9703887 ama e-mail: the.haven@nhs.net
Waxa kale oo lagu heli karaa afaf dhawr ah:  www.avon.nhs.uk/haven

Xaashidan waxa soo-saaray The Haven Health Assessment Service oo ay weheliyaan Avon Health Protection Unit.
Markii ugu danbaysay ee la cusboonaysiiyey Maarso 2008

Somali / Soomaali

## Maxay tahay Qaaxadu (TB)?
TB waa cudur fida oo halis ah oo badi ku dhaca sanbabada laakiin ku dhici kara qaybaha kale ee jidhka. TB waxay ku dhacdaa dad badan oo jooga adduunka meel kasta.

## Waa maxay calaamadaha TB?
Calaamadaha ugu caansan ee TB waa:
- Qufuc qaata in ka badan 3 toddobaad
- Qandho (xumad)
- Dhidid habeenkii ah
- Qufac dhiig leh
- Cuntada oo laga go'o
- Culayska oo hoos u dhaca
- Dareen itaal darro iyo daal.



## Sidee lagu qaadaa TB?
Marka uu qof qaba TB-da sanbabku qufaco, candhuuf tufo ama hindhiso, jeermiska TB ayaa hawada raacaya. Dadkii kale ayaa neef ahaan u qaadanaya jeermiskii oo qaadaya TB.

Infekshanka TB laba nooc oo kala duwan ayaa ugu kobcaa jidhka. Mid waxa la yidhaahdaa TB firfircoon, ta kalena waa TB huruda. TB-da firfircoon calamadaha ayaa kobca oo dadka ayaa markaas laga yaabaa in ay bukoodaan.

TB-da huruada macnaheedu waa jeermiskii ayaa jidhkaaga dhex "hurda". TB-da huruda waxay jiri kartaa muddo dheer xataa sannado, bila astaan. Ma dareemaysid jirro, infakshana ma qabtid. Laakiin, haddii aan lagaa dawayn, waxa mar-mar suurtogal ah in TB-da hurudaa noqoto mid firfircoon oo aad jirrato.

## Ma jiraan cid si gaar ah halis ugu ah qaadista TB?
Cid kastaa waa qaadi kartaa TB, laakiin waxa aad halis aad u tahay haddii aad xidhiidh dhaw la yeelato qof qaba TB-da firfircoon. Waxa kale oo ay aad suurtagal u tahay in ay qaadaan dadka ay daciiftay awoodooda la-dagaalanka infakshanku.



## Ma la daweyn karaa?
Sida badan infekshanka TB waa la dawayn karaa, gaar ahaan haddii daaweynta hore loo bilaabo oo la dhamaysto daawada. Taasi waxay badi qaadataa 6 – 9 bilood.

> Daawada waa in loo qaato sida lagu faray oo la dhamaysto dhammaanteed. Haddii aad xataa ladnaan dareento, waa muhiim inaad qaadato daawada ilaa inta lagu odhanayo jooji.
>
> TB daawadu waxba kama tari karto haddii daawada loo qaato si qaldan ama hore loo joojiyo, markaas oo jirradu noqon karto wax adag ama aan la daawayn karinba.

Sida ugu fiican ee looga hortagi kara faafinta TB waa daaweyn hore iyo daaweyn buuxda oo loo qaato jirrada.

## TB-da ma lagaga hortagi kara tallaal?
Maya markasta. Tallaalka BCG wuxu bixin kara kahortag aan ahayn 100% oo da'dana la sii yaraada. Tallaalka BCG dhab ahaan waa in la bixiyo marka ilmuhu dhasho. Tallaalka BCG waxa kale oo marmar la siiyaa ilmaha waaweyn iyo dadka waaweyn.

## Sideen ku ogaan kara in TB i hayso?
Raajada feedhaha ayaa badiyaa muujisa TB-da sanbabka.

Imtixaan fudud oo maqaarka lagu sameeyo oo la yidhaa "Mantoux" ayaa lagu ogaadaa haddii aad qabto TB-da ama TB ay ku jirto qayb kale oo jidhkaaga ah. Dheecaan yar ayaa lagu duri maqaarkaaga gacanta. Ilaa 48 – 72 saacadood kadib ayuu kalkaaliyuhu fiirin doonaa meeshaas.

Haddii aad qabto, waxa la arki barar iyo marmar nabar. Taas macnaheedu waa inaad hore ula kulantay jeermiska TB. Waxaad qabtaa TB huruda ama firfircoon oo waxaad u baahan tahay baadhitaano dheeraad ah amaba daaweyn.

Haddii aanad waxba qabin meesha la duray waxba ka muuqan maayaan. Kalkaaliye ayaa kuu sheegi haddii aad u baahan tahay tallaalka BCG sida ku cad Siyasadda Tallaalka BCG ee Qaranka.

## Waa ayo qofka la rabo inuu qaato tallaalka BCG?
Dadka ka yar 16 sanno jir ee:
- ka yimid dal TB can ku tahay.

Dadka da'da 16 -35 jir waxa **laga yaabaa** inay u baahdaan BCG:
- Haddii ay ka yimaadeen dal can ku ah TB.

Haddii adiga ama ilmahaagu aad hore u qaadateen tallaalka BCG uma baahnid mid kale.